



UJEEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay **29/10/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iyyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXIYE:- SULEIMAN MOALIN HASSAN, Ina Faduma Maxamed Jimale, Somali ah, Ku Dhashay: Mahadaay, Sanadkii 01/06/1988, Sita: Somali Passport, Lr. P01208017

LA WAKIISHE:- MUSTAF HASSAN MOHAMUD, Hooyo: Faadumo Sheekh Maxamed, Somali ah, Ku Dhashay: Mahadaay, Sanadkii: 01/07/1995, Sita: Somali Passport, Lr. P00953472

TILMAAMAHA DHULKA

Dhul Banaan oo Ku yaal: **Muqdisho**, Degmada: **(Kaaraan)**, Cabirka: **(20X15-Mt)-M**, Looto No: **86**, Sida ku cad warqadda Heshiis kala gadasho dhul banaan: **(Ref.45/2023)**, **Tr. 31/12/2023**, Kana Soo Baxay Nootaayo Xaaji Tuurxume, Uuna Saxiixay Drs. Safiyo Yuusuf Tuurxume .

SOOHDINTA DHULKA

Bari: **Jid**, Koonfur: dhul dad, Galbeed: dhul dad, Waqooyi: dhul dad

B- Aniga oo ah **SULEIMAN MOALIN HASSAN**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay **MUSTAF HASSAN MOHAMUD** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo Ku Saabsan Dhulka Tilmaamihiisu Sare Ku Xusan yihiin, in dhulkaas uu gadi karo, Wareejin Karo, Hibeyn karo, dhisi karo, ijaari karo, u dacwoon karo, qareen u qaban karo, uguna doodi karo Maxkamadaha dalka hortooda, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **MUSTAF HASSAN MOHAMUD** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga Dhulkaas aan soo sheegay ka macaamilideeda wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **MUSTAF HASSAN MOHAMUD**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada uu isiiyey **SULEIMAN MOALIN HASSAN**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA

SULEIMAN MOALIN HASSAN

Suleiman

1- MOHAMED KHALIF RAGE

Mohamed Khalif Rage

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

MUSTAF HASSAN MOHAMUD

Mustaf

2- ABASS ABDI HASSAN

Abass Abdi Hassan

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1922/T.P.N/25, Tr. 29/10/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- SULEIMAN MOALIN HASSAN** Ahna (Wakaalad Bixiye), **2- MUSTAF HASSAN MOHAMUD** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuql.

By: Abdul


NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"



Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"





FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
HAJI TURHUME PUBLIC NOTARY OFFICE

Ref. 45/2023

Tr. 31/12/2023 M waafaqsan 18/06/1445 H

UJEEDO: HESHIIS KALA GADASHO DHUL BANAAN

Maanta oo ay taariikhdu tahay 31/12/2023-M waafaqaysa 18/06/1445-H, waxaa hor yimid xafiiska Nootaayo Xaaji Tuurxume oo ku yaalla Degmada Yaaqshiid, iyaga oo heshiis ah dadka kala ah:

1. **Deeqo Muxudiin Maxamed**, ahna Soomaali, ina **Madiino Cali Maxamuud**, ku dhalatay **Xamar**, sanadkii 1973, degan **Xamar**, lehna Baasaboora No. **P01439286**. (Iska iibisada Dhulka)
2. **Hussein Mohamud Mohamed (Ish-Caley)**, ina **Faadumo Maxamuud Maxamed**, ku dhashay **Xamar**, sanadkii 1973, degan **Xamar**, lehna Laysin No. **39366**. (Damiinul Maalka Iska iibisada Dhulka)
3. **Mac.Yuusuf Maxamed Yabarow**, ina **Anbiyo Aadan Afey**, ku dhashay **Jowhar**, sanadkii 1968, degan **Xamar**, isagoo wakiil u ah **Suleiman Moalim Hassan**, ina **Fadumo Mohamed Jimale**, ku dhashay **Mahaday**, sanadkii 1988, degan **Kenya**, lehna Baasaboora No. **P01208017**. (Wakiilka Iibsadaha Dhulka)

Hadaba labada daraf waxey nootaayada horyimideen ayaga oo heshiis ah waxeyna iga codsadeen in aan u kala qoro heshiis kala gadasho boos banaan waxeyna ku heshiyeen sidan:

Iska iibiso Deeqo Muxudiin Maxamed waxey cadeysay ayadoo caafimaad qabta oo eysan jirin cid ku qasabtay beecan in ay ka iibisay kuna wareejisay **Suleiman Moalim Hassan** oo uu wakiil u yahay **Mac.Yuusuf Maxamed Yabarow boos Banaan**, kuna yaallo **Muqdisho** degmada **Kaaraan**, cabirkiisu yahay **W.DH. 20x15-M**, Lotto Lam. **86**, soohdiintiisu tahay Bari jid, Inta kale Dhul dad, waxay iska iibisadu dhulkaas ku milkisay Warqad Nam. **2105/2000** kuna taariikheysan 05/08/2000, kana soo baxday maxkamada **Degmada Kaaraan** ku saxiixan yihiin Kaaliyaha maxkamada **Axmed Shiikh Cali** iyo Garsooraha **Dr.Cumar Salaad Sabriye**, waxeyna ku gadatay lacag dhan **\$24,000** (Labaatan Afar Kun Doolarka Mareykanka ah), lacagtaas oo dhamaanteed gacanta laga wada saaray iska iibisada, sida ay ka qiratay nootaayada horteeda. Waxayna sidoo kale cadeysay in **dhulka** ay gaday ka madax banaan yahay dayn, rahan, xuquuq cid kale iyo canshuurta dawladda ee ku waajibtay dhulkaas sida ku cad warqadda (Nulla Oste) kana soo baxday xafiiska Wasaaradda Maaliyadda ee Soomaaliya. Waxaa kale oo ay iska iibisadu ballan qaaday in ay mas'uul buuxa ka tahay wixii cillad ah ee ka yimaada milkiyadda dhulkaan sida duris xagga sharciga, lahanshiyo cid kale iyo kala duwanaansho dhulkaan iyo looto nambarka kiisa.

Wakiilka Iibsadaha Mac.Yuusuf Maxamed Yabarow wuxuu asagoo maankiisa qaba cid qasabtayna aysan jirin ku cadeeyay heshiiskan in uu iska eegay dhulkaan uuna ku qancay heshiiska kala gadashada dhulka, uuna ku aqbalay beecan raali ahaanshaha iibsadaha. Sidaas darteed milkiyadda dhulka tilmaamihiisa kor ku xusan waxey u wareegtay iibsadaha sare ku xusan waana beec ansax ah waafaqsan shareecada islaamka.

**SAXIIXA ISKA IIBISADA
DHULKA
DEEQO MUXUDIIN
MAXAMED**

**SAXIIXA DAMIINUL MAALKA
HUSSEIN MOHAMUD
MOHAMED (ISH-CALEY)**

**SAXIIXA WAKIILKA IIBSADAHA
MAC.YUUSUF MAXAMED
YABAROW**

1- XASAN TUURYARE CABDULLE
TEL: 0615696693

2- C/QAADIR AXMED MAXAMED
TEL: 0615516448

SUGITAANKA NOOTAAYADA

Ref. 45/2023 ee Tr. 31/12/2023 Aniga oo ah Nootaayaha Xaaji Tuurxume **Drs. Safiyo Yuusuf Tuurxume** waxaan sugay in saxiixyadan kor ku qoran iyo kuwa ku keydsan diiwaankuba ay yihiin saxiixyadii runta ahaa ee lagu saxiixay Nootaayada horteeda waana sugitaan saxiixyo beec ansax ah waafaqsan shareecada Islaamka. Waxeyna nootaayadu ku qortay diiwaanka guud.

NOOTAAYAHA
DRS. SAFIYO YUUSUF TUURXUME

Safiyo






FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 06/11/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **MUSTAF XASAN MAXAMUUD** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1922/T.P.N/25, Tr. 29/10/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	MUSTAF XASAN MAXAMUUD
La Wakiishay	Dhul
Cabirka	20X15
Ku Yaallo	Muqdisho, Degmada Kaaraan
*Lotto Lambar	86
W.M.L	45/2023, Tr. 31/12/2023 Ka soo baxday Nootaayo TXaaji Tuurxume
Taariikhda Wakaalada	29/10/2025

La Wakiishe: Aniga oo ah **MUSTAF XASAN MAXAMUUD**, Leh Tel No. **0615642832**, Degan **Kaaraan** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

MUSTAF XASAN MAXAMUUD